

Waxaad fileyso markaad turjumaan ku isticmaaleysid taleefanka

Waa ayo turjumaan?

Turjumaanku waa qof ku hadla luuqadaada. Waa shaqadooda inay kaa caawiyaan inaad tiraahdo waxyaalo oo aadna fahamto wixii adiga lagu yiri, haddii aadan dareemeynin inaad ku fiican tahay ku hadalka Ingiriiska.

Muxuu sameeyaa turjumaanku?

Shaqadoodu waa inay u turjumaan erayadaada Ingiriis si qofka shaqaalaha ah ee aad la hadleysid kuu fahmo, iyo inaad fahmi kartid waxa Ingiriiska lagu yiri. Shaqaaluhu wuxuu noqon karaa maareeyaha kiiskaaga, dhakhtar, la taliye, shaqaalaha bulshada iwm.

Turjumaanada waxaa lagu tababaray **inaysan** wax faallo ah dhihin, tallo bixin ama aysan fekerkooda shakhsiyeed sheegin. **Waa inay turjumaan wax kasta oo la yiri oo aynan wax intaa ka badan ku darin.**

Sidee buu turjumaanku taleefanka uga caawinayaa?

Adiga, turjumaanka iyo shaqaalaha ayaa taleefan soo wadageliya isku wakhti inkastoo laga yaabo inaad meelo kala duwan joogtaan. Markaad hadlaysid, u hadal sidii adoo si toos ah ula hadlaya shaqaalahaaga turjumaanka ma aha. Markaad dhammeysid hadalka, turjumaanka ayaa turjumi doona wixii aad ku tiri shaqaalaha.

Waxaad sameynaysid intaad wicitaanka ku jirtid

- > Isticmaal hadal gaagaaban oo sug inuu turjumaanku turjumo
- > Samir oo sug turjumaanku inuu dhammeeyo turjumida ka hor intaad mar labaad hadlin
- > U sheeg turjumaanka haddii aysan wax fahmin. Wakhti kasta waad joojin kartaa si aad u weydiisato sharaxaad ama macluumaad dheeraad ah



Maxaan sameeyaa haddii aan aqaan turjumaanka?

Haddii aad ogaatid inaad turjumaanka taqaanid, adigaa go'aanka iska leh inaad sii wadatid isticmaalka turjumaankaas. Haddii aadan rabin, waxaad u sheegi kartaa shaqaalahaaga. Waa hagaag inaad tiraahdid kuma faraxsani oo aad joojiso wicitaankaaga taleefanka. Ballan cusub ayaa lagu sameyn karaa wakhti kale iyo turjumaan ka duwan.

Ka waran haddii aanan ku faraxsaneyn turjumaada?

Haddii aadan ku faraxsaneyn turjumaada sidaa dheh, haddii ay kugu adag tahay fahmida turjumaanka waa inaad ugu sheegtaa shaqaalahaaga taleefanka. Ballan cusub ayaa lagu sameyn karaa wakhti kale iyo turjumaan ka duwan.

Ma codsan karaa turjumaan dumar ah ama rag?

Haa, haddii aad kala doorbideyso rag iyo dumar waa inaad sidaa tiraahdaa marka ugu horeysa ee lagu weydiyo haddii aad turjumaan u baahan tahay. Tan waxaa laga yaabaa inay qaadato wakhti badan in turjumaan la ballamiyo.

Ma ammaan baa inaan turjumaanka u sheego dhibaatadeyda?

Waa muhiim inaad macluumaad la wadaagtid si daacad ah oo furfuran. Yeysan cabsi ama yaxyax kaa celin inaad ka hadasho ama la wadaagto dhibaatooyinkaaga. Turjumaanadu waxay halkaas u joogaan inay adiga iyo shaqaalahaagu aad isfahamtaan. Waxaa jira xeerar ku saabsan waxa turjumaanku uu sameyn karo amase uusan sameyn karin. (Kuwan waxaa la yiraahdaa Xeerka Anshaxa AUSIT.) Tan micnaheedu waxaa weeye turjumaanku kalama hadli karo arintaada cid kale.

Ku isticmaalida turjumaanka taleefanka waxay caawineysaa in wixii aad ka hadashaa yihiin wax gaar ah sababtoo ah turjumaanku kuma arki karo. Haddii taasi aysan kugu filneyn, waxaad ballansan kartaa turjumaan degan gobol kale (tusaale, haddii aad degan tahay Victoria turjumaanka waxaa laga yaabaa inuu ku nool yahay Queensland). Waxaad sidoo kale weydiin kartaa shaqaalahaagu inuusan kuu isticmaalin magacaaga dhabta ah turjumaanka hortiisa. Fadlan ogow in doorashooyinkani aysan markasta suurtagal ahayn.

Waxyaalaha aad xasuusaneysid

- > Turjumaanadu waxay halkaas u joogaan inay kaa caawiyaan inaad ula hadashid shaqaalahaaga si xor ah oo furan.
- > Turjumaanadu waxay turjumaan oo kaliya wixii la yiri: ka badana ma leh; ka yarna ma leh.
- > Turjumaanadu uma sheegi karaan cidna waxaad ka tiri taleefanka.
- > Haddii aad ugu faraxsanaan lahayd, waxaad weydiisan kartaa turjumaan dumar ah ama rag.
- > Haddii aadan ku faraxsaneyn ama aadan ka helin turjumaanka waxaad weydiisan kartaa mid cusub.